



U deg-dega camalka saalixa ah inta aanay idinku imaan fitnooyinka la moodo qayb habeen ah oo mugdi ah

Abii Hureyra -Allaha ka raali ahaadee- wuxuu Rasuulka -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- ka wariyey inuu yiri: "U deg-dega camalka saalixa ah inta aanay idinku imaan fitnooyinka la moodo qayb habeen ah oo mugdi ah, oo ninku waabariisanaayo isagoo Muumin ah oo galabaysanaayo isagoo gaal ah ama uu galabaysanaayo isagoo muumin ah oo uu waabariisanaayo isagoo gaal ah, oo uu diintiisa ku iibsanaayo xoogaa aduunyo ah.

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu-naxariis iyo nabdi korkiisa ha ahaate- wuxuu ku boorinayaa qofka muuminka ah inuu u deg-dego oo uu badsado camalka saalixa ah, inta aan la waayin ama aan lagu mashquulin, fitnooyin iyo shubahaat imaandoona oo u diidaya oo ka hor istaagaya camalka saalixa ah, fitnooyinkaasi waxay la mid yihiin qayb habeen mugdi ah, oo ay isku darsamayaan xaqa iyo baadilku, oo dadka ay ku adkaanayso inay kala saaraan, oo sida ay u daran tahay ay dadku isku dhex yaacayaan ilaa qofku uu waabariisto isagoo muumin ah oo galabaysto isagoo gaal ah, oo uu galabaysto isagoo muumina oo uu waabariisto isagoo gaala, oo diintiisa uga tago xoolo aduunyo oo dhamaanaya.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3138>

